

Ku socota qofk loo qorey cuntooyinka nafaqada ama qalabka lala isticmaalo dadka lagu quudiyo tuumada cuntada

Waxaa aad ka dalban kartaa alaabaha adiga oo adeegsanaya:

- Adeega elektaroonig ee 1177 Vårdguiden

<https://regionservice.vgregion.se/lmn/bestallningleverans/>



- Xarun adeega macaamiisha ee Skövde (Skövdedepån)
Lamarka telefoonka: 010 – 441 31 90

Sideen u heli karaa alaabaha la ii qorey?

Alaabta waxaa laguugu keeni doonaa guriga aad degeny tahay muddo shan maalmood gudahood ah. Waxaa aad kala dooran kartaa in laguugu keeno dhamaan alaabta laguugu qorey oo dhan ama qayb ka mid ah alaabta. Marka aad rabto in aad dalbato alaab cusub waxaa aad ka dalban kartaa bogga internetka ee 1177.se ama wac xarun adeega macaamiisha (kundtjänst)

Haddii aad rabto in guriga laguugu keeno alaabta:

- Fadlan wargali haddii aad dhacdo in aad badesho cinwaanka guriga alaabta laguugu keeni jirey, koodka lagu soo galo irrdika iyo lambarka telefoonka.

Haddii aad rabto in alaabta laguugu keeno goobaha laga soo qaato aalaabaha:

- Haddii aad rabto in qof kuu dhow uu alaabta ku soo qaado waxaa loo baagnayahay in uu qofkaasi wato kaadhka aqoonsiga.
- Haddii aad ka soo qaadan weydo alaabtaada goobaha laga qaato alaabaha muddo 7 maalmood gudahooda dib ayaa loo celin alaabtaada.

Dib u soo celin iyo ka cabasho

Waxaa dib loo soo celin karaa oo kaliya dalabka cusub isla markaana aan laga furin baakada ay alaabtu jirto. Alaabaha hadhaaga ah dib looma soo celin karo.

Haddii aad hesho alaab qaldan oo aan aheyn alaabtii aad dalbatey, tiro qaldan ama baakada lagu direy alaabta uu dhaawac soo gaadho, fadlan la xidhiidh xarunta adeega macaamiisha (kundtjänst) ama isticmaal foomka lagu magacaabo LMN ee ku jira bogga internetka ee : <https://regionservice.vgregion.se/lmn/bestallningleverans/avvikelser/retur/>

Imisa ama meeqa ayaan bixin doonaa? *

- Nfaaqada – carruurta
Carruurta bukaan socodka ee ay da'doodu ka yartahay 16 sanno khidmada la bixinayo waa 120 karoon halkii mar ee lala soo baxaba, ugu badnaan alaabta dabooli karta baahida 90 maalmood. Haddii lala soo baxo marar badan muddadaas waxaa la soo dalci doonaa 120 karoon dalab kasta oo la sameeyo.
- Nafaqada – dadka waaweyn
Shaqiyaada ay da'doodu ka weyn tahay 16 sanno, khidmada bukaan socodka ee ay bixi doonaan waa boqolkiiba 50 qiimaha ay alaabt joogto. Bukaan socodka ay noloshoodu gabi ahaan ku xidhantahay nafaqada, waxaa ay bixin doonaan ugu badnaan 1500 oo karoon bishiiba
- Qalabka lala isticmaalo dadka lagu quudiyo tuumbada (Sondmatningstillbehör)
Qalabka lala isticmaalo dadka lagu quudiyo tuumbada uma baahna in ay bixiyaan wax lacag ah dadka waawey iyo carruuta labadaba.

Goorma ayey iman doontaa warqada qaan sheegashadu (fakturaN)?

Warqada qaan sheegashadu (fakturan) waxaa lagu soo diraa boosta bisha ka danbeysa marka aad hesho alaabta lagu soo direy.

Wixii su'aalo ah ee la xidhiidha warqada qaan sheegashada (fakturan) waxaa haboon il lala xidhiidho qaybta qaabilsan khidmadaha bukaan socodka lambarka telefoonka 010 – 441 01 00.

| *Khidmada ku soo hagaageys bukaan socodka (Patientens egenavgift) | |
|--|--|
| Mishiinka nafaqada ee lala isticmaalan dadka lagu quudiyo | Lama bixiyo wax lacag ah |
| Qeybinta (Distribution) | Lama bixiyo wax lacag ah |
| Alaabooyinka nafaqada ee loogu talogaley carruurta ka yar 16 sanno | Khidmada bukaan socodku waa 120 karoon ugu badnaan alaabada dabooli karta baahida 90 maalmood. |
| Alaabooyinka nafaqada ee loogu talogaley dadka waaweyn | khidmada bukaan socodka uu bixi doonaan waa boqolkiiba 50 qiimaha ay alaabt joogto. Ama ugu badnaan 1500 oo karaan bishiiba, bukaan socodka ay noloshoodu ku xidhantahay alaabta nafaqada. |

Muhiim haddii ay dhaco in uu isbedel ku yimaado xaalada degaanka aad degentahay

Haddii aad ka guurto gurigaaga caadiga ah (guriga aad iska leedahay) isla markaana aad u guurto degaan gaar ah waa in lala xidhiidho cidii kuu qortey nafaqada si loo hubiyo in qiimaha alaabtaadu uu sax yahay iyo in kale.